A KASMIGA AH

الجريدة الر

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Muqdisho, 25 Maarso 1977.

Madaxtooyada J.D.S.

BAX

جريدة شهرية

waa 5 shilin lambar waliba — waa Sh. 100 Somaliya

y

ska ee

K O O B N I I N

**BOGGA KOOWAAD**

**S H A R C I**

*Dib u habayn*

Bogga 272

29 17 Feberaayo 1977,, *Dhismaha Jagada*

» 273

1977, Daawooyinka Iibka

» 274

L. ee 5

*aad.* » 276

31 *The Agreement on Islamic. Conferen-*

» 277

L. 32 ee 7 Maarso 1977, *Ilaalinta Guud ee Wakaaladda Xeryaha iyo Xannaanada Digaagga iyo ugaarta.* » 278

**BOGGA LABAAD**

**X E E R**

J.D.S. ee 16.7.1977, *Dhis-*

*L. 27* 280

**WAKAALADDA**

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. ee 16.2.1977, *Magacaabid Wasiirro ku-Xigeenno Wasaaradda Gaashaandhigga L. 28* » 281

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. ee 7.3.1977, *Magacaadib Guddi Caddaaladeed L. 29* » 283

BOGGA SADDEXAAD

TALOOYIN, ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

WASAARADDA HAWLAHA GUUD 8.2.1977, Naado *Dhul Jaalle Cabdikariim Canshuur Cabdalla L. 94* » 284

WASAARADDA HAWLAHA GUUD 8.2.1977, Naado *Dhul Jaalle Dr. Cumar Hilowle Maxamed L. 95* » 285

WASAARADDA HAWLAHA GUUD 8.2.1977, Naado *Dhul Jaalle Cabdullaahi Maxamed Nuur L. 96* » 286

WASAARADDA HAWLAHA GUUD 8.2.1977, Naado *Dhul Jaalle Yuusuf Xaaji Warsame L. 97* » 287

WASAARADDA HAWLAHA GUUD 8.2.1977, Naado *Dhul Jaalle Saciid Ciise Cabdi L. 98* » 288

WASAARADDA HAWLAHA GUUD 8.2.1977, Naado *Dhul Jaalle Cabdulqaadir Ciise Cabdi L. 99* » 289

WASAARADDA HAWLAHA GUUD 8.2.1977, Naado *Dhul Jaalle Cali Shido Cabdi L. 100* » 290

WASAARADDA HAWLAHA GUUD 8.2.1977, Naado *Dhul Jaalle Cabdulqaadir Xuseen Gacalow L. 101* » 291

WASAARADDA HAWLAHA GUUD 8.2.1977, Naado *Dhul Jaalle Cabdullaahi Cumar Cabdi L. 102* » 292

WASAARADDA HAWLAHA GUUD 8.2.1977, Naado *Dhul Jaalle Cumar Macallin Maxamed L.103* » 293

WASAARADDA HAWLAHA GUUD 8.2.1977, Naado *Dhul Jaalle Maxamed Xuseen Maxadoow L. 104* » 294

WASAARADDA HAWLAHA GUUD 8.2.1977, Naado *Dhul Jaalle Gacal Geeddi Cosoble L. 105* » 295

WASAARADDA HAWLAHA GUUD 8.2.1977, Naado *Dhul Jaalle Caasha Ismaaciil Faahiye L. 106* » 296

WASAARADDA HAWLAHA GUUD 8.2.1977, Naado *Dhul Jaalle Hilowle Macallin Maxamed L. 107* » 297

.1977, Naado *108* » 298

13.3.1977 lu- *1034 oy leeyahay Abshiro 08/Bis.* » 299

GOBOLKA HARGEYSA 15.2.1977, *lumid jeeg Wareega lam. 135142 ku qornayd Sh. So. 15.000 uu leeyahay Jaalle Cabdi Axmed Nuur L. 109* » 300

GOBOLKA BANAADIR 7.3.1977, *Lumid buugga kaydka L. 4094/4 ku qoran tahay Sh. SO. 3.149 ay leeyahay Jaalle Luul Cilmi Barkhadle L. 110* » 301

GOBOLKA BANAADIR 14.3.77. *lumid buugga kaydka lamb 10544 ku qoran Sh. SO. 3,00 ay leedahay Xaawo Maxamuud Guutaale L. 110/Bis.* » 302

## BOGGA KOWAAD

## SHARCI

SHARCI L. 28 ee 17 Feberaayo 1977, dib u habayn Dhismaha Wasaaraadda Gaashaandhigga.

*MADAXWEYNAHA*
*J. D. S.*

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad, tan 2aad iyo tan 3aad ee kacaanka 21ka Oktoobar 1969

ISAGOO ARKAY: Sharciyada lambarkoodu yihiin 17, 18 iyo 19 ee soo baxeen 1dii Luulyo 1976

ISAGOO ARKAY: Sharciga lam. 15 taariikh 6dii Abriil 1969 ee lagu dhisay Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed.

ISAGOO AQOONSADAY: inay tahay lagama maarmaan in Dhismaha Wasaaradda Gaashaandhigga wax laga beddelo dibna loo habeeyo.

ISAGOO TIXGELIYEY: Ra'yiga Wasiirka Wasaaradda Gaashaandhigga.

ISAGOO TIXGELIYEY: Goaanka Guddiga Siyaasadda.

Qodobka 1aad
*(Did u habayn dhismaha Wasaaradda Gaashaandhigga)*

Si Wasaaradda Gaashaandhigga ay u fuliso waajibaadka ka saaran difaaca qaranka, loona xoojiyo xilkeeda maamulka sare ee Wasaaradda Gaashaandhigga wax baa laga beddelay waxaana loo habeeyey sida soo socota:

1. marka laga billaabo 16ka Feberaayo 1977, waxaa la mideeyey jagooyinka Wasiirka Gaashaandhigga iyo Taliska xoogga Dalka Soomaaliyeed.

2. Waxaa la baaba'shay jagada iyo magaca taliska Xoogga Dalka Soomaaliyeed iyo Taliska Ciidanka Dhulka.

Qodobka 2aad
Xeer Nidaamiye

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ee Soomaaliya, markuu dhegeystay talada Wasiirka Gaashaandhigga, wuxuu soo saari doonaa xeer Nidaamiye lagu habeynaayo dhismaha Wasaaradda Gaashaandhigga.

Qodobka 3aad
(Dheqan Gelid)

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 17.2.1977,

Madaxweynaha Jamhuuriyadda D. Soomaaliya
*(Jaalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre)*



SHARCI L. 29 ee 17 Feberaayo 1977, Dhisidda jagada Wasiir ku-Xigeen.

MADAXWEYNAHA
J. D. S.

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad, tan 2aad iyo tan 3aad ee kacaanka 21ka Oktoobar 1969.

ISAGOO ARKAY: Sharciyada lam. 17, 18 iyo 19 ee soo baxeen 1da Luulyo 1976 kuna saabsan xilka iyo Maamulka Dawladda oo loo wareejiyey Xisbiga Hantiwadaagga kacaanka Soomaaliyeed.

ISAGOO ARKAY: Sharciga Maamulka Guud ee Dawladda lam. 14 ee 14 Juunyo 1962 iyo beddelaaddii ka dambeysay.

ISAGOO AQOONSADAY: inay tahay lagama maarmaan in la abuuro jagada Wasiir ku-xigeen ee Wasaaradaha oo idil.

ISAGOO TIXGELINAAYA: Go'aanka Guddiga Siyaasadda iyo golaha Wasiirrada.

WUXUU SOO SAARAYAA
SHARCIGA SOO SOCDA

Qodobka 1aad
*(Abuuridda jagada Wasiir ku-Xigeen)*

1. Marka laga billaabo 1da Luulyo 1976, waxaa la abuuray wasiir ku-Xigeen ee Wasiiradaha oo idil.

2. Jagadaas waxaa loo magacaabi karaa Wasiir Ku-Xigeen mid ama in ka badan, hadba intii loo baahdo.

3. Xilka Wasiir ku-xigeenka waxaa lagu soo saari doonaa xeer Nidaamiye

Qodobka 2aad
*(Magacaabid)*

Wasiir Ku-xigeenka waxaa lagu magacaabi doonaa xeer uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya isagoo dhegeystay talada Guddiga Siyaasadda.

Qodobka 3aad
*(Dhaqaalaha Wasiir Ku-xigeenka)*

Dhaqaalaha Wasiir Ku-xigeenka wuxuu la mid noqonayaa kuwa guddoomiyayaasha. Hoggaammada ee XHKS. ee lagu xaddiday sharciga lambarkiisu yahay 14 ee soo baxay 13 Luulyo 1976.

Qoddobka 4aad
*(Dhaqan Gelid)*

Sharcigaani wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS. waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee dawladda.

Muqdisho, 17.2.1977

Madaxweynaha Jamhuuriyadda D. Soomaaliya
*(Jaalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre)*

MADAXWEYNAHA

J. D. S.

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969.

ISAGOO ARKAY: Sharciyada lam. 17, 18 iyo 19 ee 1dii Luulyo 1976,

ISAGOO ARKAY: Sharciga lamb. 28 ee 25 Feberaayo 1973 kuna saabsan Daawooyinka Xoolaha ee lacag la'aanta ah;

ISAGOO AQOONSADAY: In ay tahay lagama maarmaan in Daawooyinka qaarkood oo aad muhiim aanu ahayn laga dhigo mid iib ah,

ISAGOO TIXGELINAYA: Go'aanka Guddiga Siyaasadda ee X.H.K.S. iyo Golaha Wasiirrada;

SHARCIGA SOO SOCDA

WUXUU SOO SAARAYAA

Qodobka 1aad:

Qodobka 1aad ee sharciga tirsigiisu yahay 28 ee 25 Feberaayo 1973, waxaa loo beddelay sida soo socota:

Dalka oo idil Daawooyinka Xoolaha waxaa laga dhigay lacag la'aan daawooyinka qaarkood mooye;

Qodobka 2aad

Daawooyinka Xoolaha oo iib galaya waa kuwa ku tilmaaman lifaaqa «B» ee Sharcigan;

Qodobka 3aad

Ascaarta iibka ee Daawooyinka Xoolaha oo ay ku qoran yihiin lifaaqa «B» ee Sharcigan, lama beddeli karo haddii aan dhicin isbeddel xagga Sicirka adduunka.

Beddelaaddaas, waxaa lagu soo saari karaa Xeer uu saxiixo Wasiirka Wasaaradda Xoolaha Dhirta iyo Daaqa kaddib marka uu dhegeysto Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda;

Qodobka 4aad

Daawooyinka Sharcigan tilmaamayo waxaa iibkooda iyo Maamulkooda loo xilsaaray Wasaaradda Xoolaha Dhirta iyo Daaqa.



Qodobka 5aad:

Sharci kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon karin Sharcigan waa la buriyey;

Qod. 6aad:

Sharcigan wuxuu dhaqan galayaa marka laga bilaabo maalinta uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S.

Sharcigan waxaa lagu soo saari doona Faafinta Rasmiga ee Qaranka.

Muqdisho. 6.3.77

Madaxweynaha Jamhuuriyadda D. Soomaaliya
*(Jaalle S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)*

---

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

WASAARADDA XOOLAHA DHIRTA IYO DAAQA

Magacyada Dawooyinka Xoolaha ee Iibka laga Dhigay

| Magac Dawo | | Qiyaas | Qiimaha |
|---|---|---|---|
| 1. Naganol | 5 | Gr | Waa 8.00 (Siddeed Shilin |
| 2. Antrycide | 5 | Gr | » 1.50 (Shilin iyo Bar) |
| 3. Samorin iyo Trybamidium 0.25 | | Gr | » 2.00 (Laba Shilin) |
| 4. Beranil | 1.05 | Gr | » 2.00 (Laba Shilin) |
| 5. Novidium, Ethidium iyo Homidium | 0.25 | Gr | » 1.50 (Shilin iyo Bar) |
| Oxytetracychiline | 1 | CC | » 0.50 (Nus Shilin) |
| 7. Felopen Peniciline | 1 | CC | » 0.50 Nus Shilin) |
| 8. Phizertox | 1 | Galon | »159.00 Boqol iyo konton iyo sagaal |
| 9. Silphe Tab. | 1 | Kiniin | » 0.70 (Todobaatan senti) |
| 10. Banamith Tab. | 1 | Kiniin | » 0.70 (Todobaatan senti) |
| 11. Loxon Tab. | 1 | Kiniin | » 0.30 Soddon |
| 12. Strychinine | 1 | Kg. | »610.00 (Lix Boqol iyo toban shilin) |

SHARCI L. 31 ee 5 Maarso 1977, meel marin Axdi ay saxiixeen Wasiirrada arrimaha Dibedda ee Dawladaha Islaamka shirkoodii-7aad ee lagu qabtay magaalada Istanbuul kuna saabsan (Immunisties and Priviladges for the organization of Islamic conference).

MADAXWEYNAHA

J. D. S.

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad 2aad iyo tan 3aad ee kácaanka 21ka Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY: Sharciyada kala ah 17, 18, 19 ee soo baxeen 1da Luulyo 1976;

ISAGOO ARKAY: Sharciga lam. yahay 1 ee soo baxay 1da Luulyo 1976;

ISAGOO ARKAY: Axdigii ay Dawladaha Islaamka ku kala saxiixdeen magaalada Istanbuul Shirkoodii 7aad;

ISAGOO TIXGELIYEY: go'aankii Golaha Siyaasiga ee XHKS. oo taariikhdiisu ahayd 20.1.1977.

WUXUU SOO SAARAYAA:

SHARCIGA SOO SOCDA

Qodobka 1aad

Waxaa la oggolaaday in la meel mariyo Axdigii ay ku kala saxiixdeen Dawladaha Islaamku magaalada Istanbuul Shirkoodii 7aad.

Qodobka 2aad

Axdigii wuxuu yeelan doonaa astaan sharci ah, wuxuuna ka mid noqon doonaa Sharciyada J.D.S.

Qodobka 3aad

Sharciyada wuxuu dhaqan galayaa isla marka uu saxiixxo Madaxweynaha J.D.S. waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S.

Muqdisho, 5.3.1977,

*(Jaalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre)*
Madaxweynaha Jamhuuriyadda D. Soomaaliya



LAW No, 31 5th march 1977, the Agreement on immunities and privileges of the Islamic conference

INSTRUMENT OF RATIFICATION

THE PRESIDENT
OF THE SOMALI DEMOCRATIC REBUPLIC

HAVING SEEN: 1st. 2nd 3rd Charters of Revolution 21.10.1969.

HAVING SEEN: Law No. 1. 17, 18 and 19 of 1st. July. 1976.

HAVING SEEN: The Agreement on the Immunities and Privileges of the Islamic Conference, adopted by the 7th Conference at Istanbul.

TAKING NOTE: Of the approval of the political Beruau and the Council of Ministers on 20.1.1977.
Hereby promulgates the following law.

Article 1

The Agreement on Immunities and Privileges of the Islamic Conference adopted by the 7th Conference at Istanbul-Turkiya, is hereby ratified.

Article 2

The Agreement shall have the force of law in the territory of the Somali Democratic Republic.

Rrticle 3

The Agreement shall came into force immediatly it is signed by the president of the Somali Democratic Republic and shall be published on the Official Bulletin.

Muqdisho, 5.3.1977,

President of the Somali Democratic Republic
*Major General Mohamed Siad Basre*

SHARCI L. 32 ee 7 Maarso 1977, Ilaalinta Guud ee Wakaaladda Xeryaha iyo Xannaanada Dugaaga iyo Ugaarta.

MADAXWEYNAHA

J. D. S.

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad, tan 2aad iyo tan 3aad ee kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY: Sharciyada lam. 17, 18 iyo 19 ee 1da Luuliyo 1976 kuna saabsan Habka Maamulka Dalka;

ISAGOO ARKAY: Sharciyada lamb. 34 ee 1da Maarso 1971 iyo 79 ee 12 Abriil 1975 kuna saabsan dhisidda iyo Xilka wakaaladda Xeryaha iyo xannaanada Dugaagga iyo Ugaarta;

ISAGOO AQOONSADAY: Inay ku habboontahay in ilaalinta guud ee Wakaaladda Xeryaha iyo Xannaanada Dugaaga iyo Ugaarta laga wareejiyo Madaxtooyada loona Xilsaaro Wasaaradda xoolaha Dhirta iyo Daaqa bacdamaa ujeedada gaar ah ee Wakaaladda ay ka mid tahay xilka wasaaraddaas;

ISAGOO TIXGELIYEY: Go'aankii Golaha Siyaasadda ee Xisbiga Hantiwadaagga kacaanka Soomaaliyeed iyo Golaha Wasiirrada.

WUXUU SOO SAARAYAA

SHARCIGA SOO SOCDA:

Qodobka 1aad

(Ilaalinta Guud)

Ilaalinta guud ee Wakaaladda Xeryaha iyo Xannaanada Dugaagga iyo Ugaarta waxaa laga wareejiyey Madaxtooyada, waxaana loo xilsaaray Wasaaradda xoolaha Dhirta iyo Daaqa.

Qodobka 2aad

Marka laga billaabo 1da Jannaayo 1977 Wakaaladda xeryaha iyo xannaanada Dugaaga iyo Ugaarta waxay hoos imaanaysaa Wasaaradda xoolaha, dhirta iyo Daaqa.

Wasiirka Wasaaradda Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa wuxuu awood u leeyahay inuu siiyo Wakaaladda Awaamiir iyo talooyin markay u muuqato inay hagaajineyso Maamulka Wakaaladda.

Qodobka 3aad

Wakaaladda xeryaha iyo xannaanada Dugaaga iyo Ugaarta waxaa xukumi doona sharciga lagu dhisay, sharciyada kale ee ka dambeeyay, sharcigan iyo kuwa ay ku dhaqmaan Wakaaladaha Madax Banaan, gaar, ahaan

b) Sharciga lamb. 36 ee 22 abriile 1972

t) Sharciga lamb. 74 ee 22 Abriil 1972,

Qodobka 4aad

Sharci kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon karin Sharcigan waa la buriyey;

Qodobka 5aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa marka laga billaabo maalinta uu saxiixo Madaxwyenaha J.D.S.

Qod. 6aad

Sharcigan waxaa lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Mudisho 7.3.77

Madaxweynaha Jamhuuriyadda D. Soomaaliya

*(Jaalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre)*

# BOGGA LABAAD
# X E E R

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. ee 16.7.76. Dhisidda Wasiirada L. 27

MADAXWEYNAHA

J. D. S.

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad tan 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969.

ISAGOO ARKAY Sharciyda lambarkoodu yahay 17.18 iyo 19 ee soo baxeen 1da liiliyo 1976, kuna saabsana xilka iyo Maamulka Dawladda oo loo wareejiyey Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed.

ISAGOO ARKAY: Sharciga Maamulka Guud ee Dawladda lam. 14 ee 14 Juunyo 1962 iyo beadelaadii ka dambeeyey.

ISAGOO AQOONSADAY: Ineey tahay lagama maarmaan in la baabi'iyo magacii Xoghayaha Dawladda laguna beddelo magaca Wasiir.

ISAGOO TIXGELINAAYA: Go'aanka Guddiga Siyaasadda iyo Golaha Wasiirada.

WUXUU SOO XEERAYAA

Qodobka 1aad

(Baa'biin magacii Xoghayaha Dawladda)

Marka laga billaabo 1da Luulyo 1976, magacii la oran jiray Xoghayaha Dawladda waxaa lagu beddelay **«Wasiirka»**.

Qodobka 2aad

(Dhaqaalaha Wasiirka)

Dhaqaalaha Wasiirka wuxuu noqanayaa kii hore ee xoghayaha ee lagu xaddadaaay xeerka lambarkiisu yahay 21. taariikh 27 Nofember 1969 iyo xeerarkii ka dambeeyey.

Qodobka 3aad

(Dhaqan Gelid)

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Wadaxweynaha J.D.S., waxa lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda

MUDISHO 16.7.1976

Madaxweynaha Jamhuuriyadda D. Soomaaliya
*(Jaalle S.Gaas Maxamed Siyaad Barre)*



XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. ee 16.2.77, Magacaabid Wasiirro Ku-Xigeenka Wasaaradda Gaashaandhigga L. 28

MADAXWEYNAHA

J. D. S.

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad tan 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969.

ISAGOO ARKAY: Sharciyada lambarkoodu yihiin 17,18 iyo 19 ee soo baxeen 1 luuliyo 1976.

ISAGOO ARKAY: Sharciga lambarkiisu yahay 1 ee soo baxay 1 Luulyo 1976

ARKAY: Qaanuunka ku saabsan dhismaha Dawladda lambarkiisuna yahay 14 ee soo baxay 12 Juunyo 1962 iyo beadelaadii ka dambeeyay.

ARKAY: Sharciga lambarkiisu yahay 29 taariikh 17.2.77. ee lagu abuuray jagada Wasiir ku xigeen ee Wasaaradaha.

In ay tahay lagama maarmaan in Wasaaradda Gaashaandhigga loo magacaabo Wasiirro Ku-xigeenno si loo kala Agaasimo hawlaha Maamulka abaabulka, iskuduwidda, hirgelinta Qorshaha tababarka iyo Kormeerka.

ISAGOO TIXGELINAYA: Ra'yiga Wasiirka Wasaaradda Gaashaandhigga.

WUXUU SOO XEEREYAA

Qodobka 1aad

*(Magacaabid Wasiirro ku-Xigeenno)*

Marka laga billaabo 15ka Feberaayo 1977, Jaallayaasha magacyahoos ku qoran yihiin waxaa lagu magacaabay Wasiirro ku-xigeen Wasaaradda Gaashaandhigga:

1 Jaalle Sarreeya Guuto Maxamuud Geelle Yuusuf Wasiir ku-koowaad iyo Abaanduulaha xoogga Dalka Soomaaliyeed.

Jaalle Sarreeye Guuto Cumar Xaaji Maxamed Wasiir ku-xi- Arrimaha Tababarka.

3. Jaalle Sarreeye Guuto Abuukar Xasan Weheliye Wasiir ku-Arrmiaha Saadka.

4. Jaalle Sarreeye Guuto Maxamed Nuur Galaal Wasiir ku-Xigeenka Arrimaha Farsamada.

Qodobka 2aad

*(Xeer Nidaamiye)*

Hawlaha Wasiirro Ku-xigeennnaaa ku xusan qodobka 1aad ee xeerkan waxaa lagu soo saari doonaa Xeer Nidaamiye uu saxiixo Wasiirka Gaashaandhigga.

Qodobka 3aad

(Dhaqan Gelid)

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee dawladda.

Muqdisho, 16.2.1977,

Madaxweynaha Jamhuuriyadda D. Soomaaliya
(Jaalle Sarreeye Gaas Maxamed Siyaad Barre)



XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. ee 16.2.1977 Magacaabid guddi Caddaaladeed L. 29

MADAXWEYNAHA

J. D. S.

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad tan 2aad iyo tan 3aad ee kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY: Sharciyada lam. 38 ee 5 Abriil 1972 iyo Beddelaaddii ka dambeysay;

ISAGOO ARKAY: Sharciyada lam. 17, 18 iyo 19 ee Luulyo 1976;
ISAGOO ARKAY: Sharciga lam. 1 ee Luulyo 1976;

ISAGOO ARKAY: Sharciga lam. 5 ee 16.9.1976, oo lagu dhisay guddiga caddaaladda;

ISAGOO TIXGELIYEY: Baahida loo qabo in la magacaabo Guddi caddaaladeed si caddaaladda looga wada simo dadweynaha Soomaaliyeed.

WUXUU XEERAYAA

In Jaallayaasha magacyadoodu hoos ku qoran yihiin loo magacaabay iney ka mid noqdaan Guddiga caddaaladda, iyagoo mid waliba uu qabanaayo jagooyinka hoos ku sheegan:

1. Jaalle Sarreeye Gaas Xuseen Kulmiye Afrax «Guddoomiye»
2. Jaalle Gaashaanle Sare Cabdirisaaq Maxamuud Abuukar Guddoomiye ku xigeen»
2. Jaalle Gaashaanle Sare Maxamed Cumar jees «Xubin»
4. Jaalle Dr. Cali Maxamed Ibraahim «Xubin»
5. Jaalle Dr. Maxamed Cabdullaahi Axmed «Xubin»
6. Jaalle Dr. Aadan Cabdulqaadir Maxamed «Xubin»

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 7.3.1977,

Madaxweynaha Jamhuuriyadda D. Soomaaliya

*(Jaalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre)*

TALOOYIN, ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

BOGGA SADDEXAAD

WASARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

N A A D A D H U L

Waxaa la caddaynayaa in Jaalle Cabdikariim Canshuuri Cabdalla, u soo qortay arji waaxdatan Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu ahayd 29.9.76. uu ku weydiisanayey gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar Degmada Hodan. qaabkiisuna yahay Rettangolare addimihiisuna yihiin 26X30 kuna fadhiya 780 mdh. Soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman:

| | |
|---|---|
| Waqooyi waxaa ka xiga: | Jid. |
| Koonfur waxaa ka xiga: | Jid. |
| Galbeed waxaa ka xiga: | Dhul lam. 60. |
| B a r i waxaa ka xiga: | Dhul lam. 62. |

Qofkii daneynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud waxaana laga doodi karaa mudda 30 (soddon) maalmood ah oo laga bilaabo maalinta lagu soo qoro buugga faafinta rasmiga ah.

Muqdisho 8.2.1977.

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

*(Inj. Cayduruus Cusmaan Keenidiid)*

L. 94



WASARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

N A A D A D H U L

Waxaa la Dr. Cumar Hilowle Maxamed. iyo Dhulka maalintii uu weydiisanayey gabal dhul dawla- Xamar Degmada Hodan. qaabkiisu- addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya yihiin sida hoos ku tilmaaman:

| | |
|---|---|
| Waqooyi waxaa ka xiga: | Jid. |
| Koonfur waxaa ka xiga: | Jid |
| Galbeed waxaa ka xiga: | Dhul lam. 160. |
| B a r i waxaa ka xiga: | Dhul Lam. 162. |

karaa naq- ee Wasaaradda ud lag karaa (soddon) maal- qoro buugga faafinta ras-

Muqdisho, 8.2.1977

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

*(Inj. Cayduruus Cusmaan Keenidiid)*

L. 95

## WASARADDA HAWLAHA GUUD

## WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

### N A A D A   D H U L

Waxaa la caddaynayaa in Jaalle Cabdullaahi Maxamed Nuur. u soo qortay arji Waaxdatan Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu ahayd 29.5.76. uu ku weydiisanayey gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar degmada Hodan qaabkiisuna yahay Rettangolare addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 mdh. Soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul Lam. 267.

Koonfur waxaa ka xiga: Waddo.

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul Lam. 239.

B a r i waxaa ka xiga: Dhul lam. 241.

Qofkii daneynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon) maalmood ah oo laga bilaabo maalinta lagu soo qoro buugga faafinta rasmiga ah.

Muqdisho, 8.2.1977,

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka
*Inj. Caydaruus Cusmaan Keenidiid*





## WASARADDA HAWLAHA GUUD

## WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

### N A A D A   D H U L

Waxaa la caddaynayaa in Jaalle Yuusuf Xaaji Warsame u soo qortay arji Waaxdatan dhismaha iyo dhulka maalintii taariikhdu ahayd 27.6.76. uu ku weydiisanayey gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal ...aaladatan xamar degmada Hodan qaabkiisuna yahay Rettangolare addimihiisuna yihiin 60X25 kuna fadhiya 1500 mdh. Soohdimihiisu... yihiin sida hoos ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: Jid.

Koonfur waxaa ka xiga: Jid

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lam. 49.

Bari waxaa ka xiga: Dhul lam. 52

si fiican uga arki karaa naq-
iyo Dhulka ee Wasaaradda
muddo 30 (soddon) maal-
qoro buugga faafinta ras-

Muqdisho, 8.2.1977,

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

*(Inj. Cayduruus Cusmaan Keenidiid)*

WASARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

N A A D A   D H U L

Waxaa la caddaynayaa in Jaalle Saciid Ciise Cabdi. u soo qortay arji Waaxdatan Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu ahayd 6.12-76, uu ku weydiisanayey gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar degmada Hodan. qaabkiisuna yahay Rettangolare addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 mdh. Soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman:

| | |
|---|---|
| Waqooyi waxaa ka xiga: | Jid. |
| Koonfur waxaa ka xiga: | Jid. |
| Galbeed waxaa ka xiga: | Dhul Lam. 302. |
| B a r i waxaa ka xiga: | Dhul lam. 304. |

Qofkii daneynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud waxaana laga doodi karaa mudoo 30 (soddon) maalmood ah oo laga bilaabo maalinta lagu soo qoro buugga faafinta rasmiga ah.

Muqdisho, 8.2.1977,

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka
*(Inj. Cayduruus Cusmaan Keenidiid)*

L. 98



WASARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

N A A D A   D H U L

Ciise Cabdi. u soo
iyo maalintii taariikhdu
dhul dawladeed ah oo ku
qaabkiisuna yahay Rettan-
kuna fadhiya 600 mdh. soohdimi-
iisuna

| | |
|---|---|
| Waqooyi waxaa ka xiga: | Jid |
| Koonfur waxaa ka xiga: | Jid. |
| Galbeed waxaa ka xiga: | Dhul lam. 301. |
| B a r i waxaa ka xiga: | Dhul lam. 303. |

arki karaa naq-
ee Wasaaradda
(soddon) maal-
qoro buugga faafinta ras-
miga ah.

Muqdisho, 8.2.1977.

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka
*(Inj. Cayduruus Cusmaan Keenidiid)*

L. 99

## WASARADDA HAWLAHA GUUD

## WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

### N A A D A D H U L

Waxaa la caddaynayaa in Jaalle Cali Shido Cabdi. u soo qortay arji Waaxdatan dhismaha iyo dhulka maalintii taariikhdu ahayd 6.12.76. uu ku weydiisanayey gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar degmada Hodan qaabkiisuna yahay Rettangolare addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 mdh. Soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: Jid.

Koonfur waxaa ka xiga: Jid.

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lam. 303.

B a r i waxaa ka xiga: Jid.

Qofkii daneynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon) maalmood ah oo laga bilaabo maalinta lagu soo qoro buugga faafinta rasmiga ah.

Muqdisho, 8.2.1977,

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka
*(Inj. Cayduruus Cusmaan Keenidiid)*

L. 100



## WASARADDA HAWLAHA GUUD

## WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

### N A A D A D H U L

Waxaa la caddaynayaa in Jaalle Cabduraxmaan Xuseen Gacal u soo qortay arji Waaxdatan Dhismaha iyo dhulka maalintii taariikhdu ahayd 9.8.76. uu ku weydiisanayey gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar degmada Hodan qaabkiisuna yahay Rettangolare addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 mdh. Soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman.

Waqooyi waxaa ka xiga: Jid.

Koonfur waxaa ka xiga dhul lam. 252k.

Galbeed waxaa ka xiga: dhul lam. 278k.

B a r i waxaa ka xiga: dhul lam. 280k.

Qofkii daneynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon) maalmood ah oo laga bilaabo maalinta lagu soo qoro buugga faafinta rasmiga ah.

Muqdisho, 8.2.1977,

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka
*(Inj. Cayduruus Cusmaan Keenidiid)*

L. 101

WASARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

N A A D A D H U L

Waxaa la caddaynayaa in Jaalle Cabdullaahi Cumar Cabdi u soo qortay arji waaxdatan dhismaha iyo dhulka maalintii taariikhdu ahayd 29.7.76. uu ku weydiisanayey gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar degmada Hodan. qaabkiisuna yahay Rettangolare addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 mdh. Soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: Jid.

Koonfur waxaa ka xiga: Jid.

Galbeed waxaa ka xiga: Jid

B a r i waxaa ka xiga: Dhul lam. 142.

Qofkii doneynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon) maalmood ah oo laga bilaabo maalinta lagu soo qoro buugga faafinta rasmiga ah.

Muqdisho, 8.2.1977

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka
*(Inj. Cayduruus Cusmaan Keenidiid)*

L. 102



WASARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

N A A D A D H U L

la . . u
arji ..
. . oo ku
yahay Rettan-
.. mdh. Soohdimi-
..

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo.

Dhul lam. 259.
Waddo.
a r i · dhul lam. 279.

fiican uga arki karaa naq-
iyo Dhulka ee Wasaaradda
karaa muddo 30 (soddon) maal-
qoro buugga faafinta ras-

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka
*(Inj. Cayduruus Cusmaan Keenidiid)*

L. 103

WASARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

N A A D A  D H U L

Waxaa la caddaynayaa in Jaalle Maxamed Xuseen Maxadoow. u soo qortay arji Waaxdatan Dhismaha iyo dhulka maalintii taariikhdu ahayd 8.12.1976. uu ku weydiisanayey gabal dhul dawladeed ah oo yaal Magaaladatan Xamar degmada Boondheere, qaabkiisuna yahay Rettango.are addimihiisuna yihiin 13X15 kuna fadhiya 195 mdh. Soohdimihiisuna yihiin sida hoos gi tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: Xasan Xaaji Barakoow.

Koonfur waxaa ka xiga: Waddo.

Galbeed waxaa ka xiga: Shariif Axmed Sangaaf.

B a r i waxaa ka xiga: Waddo.

Qofkii daneynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud waxaana laga doodi karaa mudoo 30 (soddon) maalmood ah oo laga bilaabo maalinta lagu soo qoro buugga faafinta rasmiga ah.

Muqdisho, 8.2.1977.

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka
*(Inj. Cayduruus Cusmaan Keenidiid)*

L. 104



WASARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

N A A D A  D H U L

Waxaa la caddaynayaa in Jaalle Gacal Geedi Cosoble. u soo portay Waaxdatan Dhismaha iyo Dhulka maalintii taariikhdu ahayd 31.-10 76. uu ku weydiisanayey gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar degmada Hodan. qaabkiisuna yahay Rettango.are addimihiisuna yihiin 40X20 kuna fadhiya 800 mdh. Soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo.

Koonfur waxaa ka xiga: Waddada Sanca.

Galbeed waxaa ka xiga: dhul dawladeed.

B a r i waxaa ka xiga: Maxamed Xuseen Cosoble.

Qofkii daneynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud waxaana laga doodi karaa mudoo 30 (soddon) maalmood ah oo laga bilaabo maalinta lagu soo qoro buugga faafinta rasmiga ah.

Muqdisho, 8.2.1977,

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka
*(Inj. Cayduruus Cusmaan Keenidiid)*

L. 105

## WASARADDA HAWLAHA GUUD

## WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

## N A A D A  D H U L

Waxaa la caddaynayaa in Jaalle Caasha Ismaaciil Faahiye. u soo qortay arji Waaxdatan dhismaha iyo dhulka maalintii taariikhdu ahayd 17.8.1975. uu ku weydiisanayey gaba. dhul dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar degmada Hodan. qaabkiisuna yahay Rettangolare addimihiisuna yihiin 30X30 kuna fadhiya 900 mdh Soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: Waado.

Koonfur waxaa ka xiga: Waddo.

Galbeed waxaa ka xiga: Waddo.

B a r i waxaa ka xiga: dhul lam. 64.

Qofkii daneynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud waxaana laga doodi karaa mudoo 30 (soddon) maalmood ah oo laga bilaabo maalinta lagu soo qoro buugga faafinta rasmiga ah.

Muqdisho, 8.2.1977,

*(Inj. Cayduruus Cusmaan Keenidiid*

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

L. 106



## WASARADDA HAWLAHA GUUD

## WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

## N A A D A  D H U L

u soo
arji ahayd
uu dhul dawladeed ah oo ku yaal Ma-
H qaabkiisuna yahay Rettangolare
kuna fadhiya 600 mdh. Soohdimihiisuna

Waqooyi waxaa ka xiga: Jid

Koonfur waxaa ka Xiga: Jid.

Golbeed waxaa ka xiga: Dhul. lam. 141.

B a r i Waxaa ka xiga: dhul lam. 143.

naq-
o W ee Wasaaradda
(soddon) maal-
qoro buugga faafinta ras-

Muqdisho, 8.2.1977,

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka
*(Inj. Cayduruus Cusmaan Keenidiid)*

L. 107

WASARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHULKA IYO DHISMAHA

## N A A D A D H U L

waxaa la caddaynayaa in Jaalle Maxamed Xuseen Cosoble u soo qortay arji Waaxdatan dhismaha iyo dhulka maalintii taariikhdu ahayd 31.10.76. uu ku weydiisanayey gaba. dhul dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar degmada Kaaraan. qaabkiisuna yahay Rettan-golare addimihiisuna yihiin 40X20 kuna fadhiya 800 mdh. Soohdimi-hiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo.

Koonfur waxaa ka xiga: Waddada Sanca.

Galbeed waxaa ka xiga: Gacal Geedi Cosoble.

B a r i waxaa ka xiga: Waddo.

Muqdisho, 8.2.1977,

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka
*(Inj. Cayduruus Cusmaan Keenidiid)*

L. 108



MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR 13.3.1877 Lumid buugga kaydka lam. 1034 oy eedahay Abshiro Saciid Warsame L. 108/Bis

HADDUU ARKAY: dacwadda kor ku oran;

MARKUU ARKAY: waxay ku saabsan tahay iyo ogeysiiska Bankiga;

HADDUU ARKAY: qod. 69 D.L. 9.965 N. 2; lumidda Buugga keydka lam. 1034 oy ku qoran tahay Sh. SO. 6.047 Bangika Ganacsiga Laanta 2aad.

WUXUU XEEREYAA

In loo cusbooneysiiyo buugga keydka kaddib markii ay ka soo wareegto 30 maalmood maalinta dekereetada lagu shaaciyo faafinta Rasmiga ah ee dawladda.

WAXAA LA CUDSANAYAA

In Buugga cusub ee la samayn doono gacanta laga saaro Abshiro Saciid Warsame ama qof isla asaga ka sita wakaalad sharci ah, ayadoo la sugaayo muddada 30 maalmood ah ee aan kor ku soo sheegnay.

Muqdisho, 3.3.1977

Guddoomiyaha Maxkamadda Gob. Banaadir
*(Cabdullaahi Daahir Barre)*

L. 108 | Bis

## MAXKAMADDA GOBOLKA HARGEYSA

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku xusan

MARKUU ARKAY: waxay ku saabsan tahay iyo ogeysiisskii Bankiga.

HADDUU ARKAY; qod. 69 D.L. 9.9.65 No; 2; iyo lumidda jeegga wareega lamb. 135142 ee Bankiga Ganacsiga Ummadda Hargeysa, kuna qornayd Sh. SO. 15.000

### WUXUU AMRAYAA

In loo cusbooneysiiyo jeeg wreega ka dib markii ay ka soo wareegto 15 maalmood maalinta Dekereetada lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

### WAXA LA CODSANAYAA

In jeegga cusub ee la sameyn doono gacanta laga saaro Jaalle Cabdi Axmed Nuur ama qof isla asaga ka sita wakaalad sharci ah, ayadoo la sugaayo 15ka maalmood ee aan kor ku soo sheegnay.

Hargeysa 14.2.77,

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka

(Xasan Xaaji Yuusuf)

L. 109



## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: dacwadda kor ku qoran;

MARKUU ARKAY: waxay ku saabsan tahay iyo ogeysiiska Bankiga;

HADDUU ARKAY: qod, 69 D.L. 9.9. 65 No. 2; lumidda buuggga keydka lam. 4094/4 oy ku qoran tahay Sh. SO. 3.149.

### WUXUU AMRAYAA

In loo cusbooneysiiyo buugga keydka kaddib markii ay ka soo wareegto 30 maalmood maalinta dekereetada lagu shaaciyo faafinta Rasmiga ah ee dawladda.

### WAXA LA CODSANAYAA

In buugga keydka cusub ee la samayn doono gacanta laga saaro Luul Cilmi Barkhadle ama qof isla asaga ka sita wakaalad sharci ah, ayadoo la sugaayo muddada 30 maalmood ah ee aan kor ku soo sheegnay.

*Muqdisho, 7.3.1977*

Guddoomiyaha Maxkamadda Gob. Banaadir
*(Cabdullaahi Daahir Barre)*

*L. 110*

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: dacwadda kor ku qoran;

MARKUU ARKAY: waxay ku saabsan tahay iyo ogeysiiska Bankiga;

HADDUU ARKAY: qod. 69 D.L. 9.9.65 N. 2; lumidda buugga keyd-ka lam. 10544 oy ku qoran tahay Sh. So. 300

WUXUU AMRAYAA

In loo cusbooneysiiyo buugga keydka kaddib markii ay ka soo wareegto 30 maalmood maalinta dekereetada lagu shaaciyo faafinta rasmiga ah ee dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA

In Bugga cusub ee la samayn doono gacanta laga saaro Xaawo Maxamuud Guutaale ama qof isla asaga ka sita wakaalad sharci ah, ayadoo la sugaayo muddada 30 maalmood ah ee aan kor ku soo sheegnay

Muqdisho 4.3.1977

Guddoomiyaha Maxkamadda Gob. Banaadir
*(Cabdullaahi Daahir Barre)*

L. 110/Bis